51 – SANAN IYO SIXIR I

Axmed Nuur: Maantana waxay dooddeenu ahaanaysaa odayaalow caadooyinka la baasaysto oo Soomaalidu baasaysato. Dooddaa waxaa ka qayb galaya: Aw Daahir Afqarshe, Fiqi Buraale, Axmed Nuur Yuusuf oo isaguna qaybtiisa ka qaadanaya. Dooddeenu maanta waxay ku saabsanaanaysaa qodobka aynu astaynay oo ah: Caadooyinka la baasaysto. Sida aynu uga doodaynaa wuxuu noqon doonaa hadba wax baynu qadaynaa waxaas aynu kaga doodaynaa, nin waliba siday la ahaato ayuu ka soo jeedin doonaa doodda uu toos uga qayb qaadan doono. Ha iigu horreeyo Aw Daahir Afqarshe. Daahirow tafaafulka iyo sixirka iyo shurugga iyo waxyaabaha maxaa Soomaalidu, erayadaas maxay kala yihiinoo, bal erayadaa noo kala bixi marka ugu horreeya intaannaba ee dooddeenuba halka nooga si balow.

Daahir Afqarshe: Waxaan jeclaan lahaa inaad marba mid i weydiisoo yaan kala illaawinee, iigu noqo marba mid i weydiiyoo waxaas tiraahdaa kaas muxuu ka daawo yahay?

Axmed Nuur: Maya! Waxaynu jeclaan lahayn inaad noo guud marto, tafaafulka, sixirka iyo shurugga waxay kala yihiin. Waxyaalaha marka u horreeya bal horta innaga inoo guud mar oo iyaga noo kala sooc, maxaa jira dheh qoloba si u taqaano gobollada Soomaaliyeed qolaba ay si u taqannaa bal horta dul mar aan kala qaad qaadanee.

Daahir Afqarshe: Tafaafulka wax la yiraahdo waa waxaan marka la kala macneeyo waxaa ka soo dhex baxa, sida faalka oo kalena ka soo qaad. Markuu ninkii faaliyaha ahaa wado wado wado oo isu soo minguuriyo isu soo mooreeyo waxaa soo hara ayuu yiraahdaa, sidaa iyo sidaa ayay noqonaysaayoo, faalkii halkaa buu soo ururayoo. Macnaha uu u jeedaa waxaa weeye tilmaan waxaa uu bixiyay markii ugu dambeeyay arrintu.

Axmed Nuur: Waxbuu wax ku cusur guurayaa baad leedahay?

Daahir Afqarshe: Wax buu ku cusurguuriyaa dabadeedna kii u dambeeyay baa tilmaan bixiyay.

Axmed Nuur: Oo tafaafulka micnihiisu waxbaa la isku cusurguuriyaa ama faal ha noqoto ama wax kaleba haa noqotee, waxaad leedahay waa wax inta la rogrogo oo xagga laga deyo oo la fiiriyo oo loo miila dayo oo loo minguuriyo ayaa markaas lagu cusur guuriyaa oo waxaa lagu qawimaa waxaan waxaasay noqon hayaan. Sidaa weeye. Fiqi Buraalow adiguna tafaafulka maxaad ka oran lahayd?

Fiqi Buraale: Tafaafulka waxaa la yiraahdo, Soomaalidu inkastoo qolo waliba si u taqaano, waxaa tafaaful la yiraahdo waxaa weeye sidaa Aw Daahir u sheegay, ha ballarto hadhow oo wejiyaal fara badan ha yeesho, laakiin waa wax la cunsur guurinayo. Bil matal geel baa nin ka duma, nin baa u faaliyay, tiradii weynayd buu qabsanayaa, waxuu oran hayaa maxaa min adduunya ah, maxaa ilma ah, maxaa moora ah, markaas saas ay waxay markhaati u dhigayaan. Markhaatigaas ay yiraahdeen haddii

| | |
|---|---|
| | sidaas la yeelo xoolihii waa la helayaa ama marka horeba wuxuu oranayaa xoolaheenii ma noola oo heli mayno, taas waxaa weeye sidaas tafaaful. Maxaa u sadaqada ha oo markaa la oranayaa samaynayaa tafaafulka caykaa ah? Wax caynkaas ah haddii aynu qalno, haddii aynu doorada saas ah u dilno, haddii aynu neefka saas ah samayno, marka waxaa weeye tafaafulka wax is dhaafin oo cunsur guuris ah. |
| Axmed Nuur | Aan dib ugu noqdo Daahir Af Qarshe, Daahir Af Qarshow Sixirka waanu maqalnaa oo waxaa la yiri waa wax caan ah oo adduunkoo dhan laga yaqaanno, sixirka waa fara badan yahay, nin Frazier la oran jiray oo ingriis ahaa ayaa wuxuu yiri adduunku wuxuu soo maray saddex heer: Heerka koowaad wuxuu yahay, adduunku markii ugu horeeyey diintii ugu horeysay ee soo gasho waxay ahayd buu yiri sixirka, marxalatu sixir wax la yiraahdo iyo marxalatu diin iyo marxalatu cilmi, saddexdaa marxaladood ayuu adduunka u qeybiyey. Annagu sideen u aragnaa sixirka, muxuu kaga geddisan yahay, Daahir Af Qarshe? |
| Daahir Afqarshe | Wuxuu kaga gedisan yahay, waxaa weeye cilmi jira oo la jirrabay oo laga shaqeeyay oo kutuba lagu qoray oo socday oo macaamiladood la yaqaan oo wax lagu laayo oo wax lagu kharibo oo dabadeed dadka Islaamka ah diintooda ay diiddan tahay. Sida innaga xaggeena ugu xoog weynaan waayay sidaa weeye. Culumadeena kutubada ku dhaadheer ee cibaadada ku wanaagsan yaa ka dhaacisay dadka islaamka ah ee ay madaxda u yihiin waxyaalahaasu guuldarrada uu leeyahay ama sida ay diintuba u ogolayn sidaas baynu uga howl yareysannay, laakiin waa wax khatar ah oo dunida caan ka ah oo qolo waliba ku shaqeysato innagana inkasta oo nalaga waaniyay cirribya badan waa naga leeyahay. Markaa dabadeed sidaa wax loogu qabtana inkastoon annagu ragga ku macaamilooda ahayn waa fara badan yihiin, markaa sidaa awgeed yay u yihiin waxaan wax cilmi ah oo jira oo mararka qaarkood haddana aad oranayso waryaa dee waxaan lagana maarmi karaba markaad aragto sida wax loogu farsameeynayo oo uu ku kaa dhaadhicinayo, laakiin dee diintu yaad xagga kan kaga cabsoonaysaa. |
| Axmed Nuur | Oo waa wax geddi diinteena ka soo horjeeda maad leedahay? |
| Daahir Afqarshe | Waa wax diinteena ka soo horjeeda. |
| Axmed Nuur | Soomaaliduna way ku dhaqantaa oo caadada Soomaalidu dad buu ugu weyn yahay. Aan u wareego Fiqi Buraalow, sixir Soomaalidu say ugu dhaqanto bal wax nooga sheeg. |
| Fiqi Buraale | Bahalkan Sixirka la yiraahdaa horta Soomaalidu way neceb tahay asalkiisu waxaa sixir la yiraahdoo way ncebyihiin, waxay yiraahdaan Diintu ma waafaqsana qof wax sixra wax sixirka ma ogola diinteenu, hase ahaatee misna dad ku dhaqma way jiraan. Misna Soomaalidu tiraahdaa sixirka kan wax kastaba ha loogugu qabdo oo si kastaba ha ahaatee, sixir waxaa ah niyadaada haddii niyadaadaasu aysan gelin |

sixirkaas wax buu ka taraa wax kasta oo lagugu qabto aad tiraahdo, “Bismillaahi Raxmaani Raxiim” aad tiraahdid wax alle waxuu ka tarahayaa ma jiraa la yiraahdaa. Diinteena ma ay ogola in wax la siciro. Sixirkaas, hase ahaatee misna waxay yiraahdaan sixirka hadba qofba sida ay niyaddiisa tahay ayuu sixirka u qabtaa, haddaba diintu ma ogola in wax la sixiro.

Axmed Nuur Sixirku waa wax yaab leh, oo Soomaalidu Waxaan maqalnaa hebel waa sixran yahay hebel waa la i sixray, hebel ee Wadaad fulaan ayaa sixray ee sixirka dadka ku shaqaystaa Soomaalidu magacya badan bay u taqaanaa waxaa ka yiraahdaa, Faakakow waa la yiraahdaa, kuhaan way dhahdaa, waxay dhahdaa wax la yiraahdo Kitaab gaablow afar-faalle waa dhahdaa ee Sixirow waa dhahdaa, bal ereydaas maxaad ka oran lahayd Daahir Af Qarshow Kitaab gablow iyo afarfaallaha iyo raggaas?

Daahir Afqarshe Kitaab-gablow iyo Afar-baallahaas oo dhan waxaa looga jeedaa, waa ragga cilmiga aad u baranin oo ku cabsaneynin baa looga jeedaaye. Ninkii intuu quraanka bartay oo cilmigii bartay oo micnihii ogaaday nin waxba sixraaya ma ahee waa ka tagayoo kaas waa dhaafay. Ninka kan ee kitaab-gablowga ahi dabadeed waa ninka maddiidada sameeya oo haweenka qardhaaska u dhiga oo waxaan ninka kugu jeclanayn yiraahdaa oo guruaba dabadeed marka laga baxee dabadeed dadka shaqo tago, dabadeed guryaha u dhaafayo oran waxaan ahay wadaad xaaladaas ku shaqaysta oo isagay meheradiisa waxaas tahayoo dabadeedee horna waa looga hadlayoo mar allaale markuu arko ragga culimada ah ee waaweyn markaasuu dabadeed kitaabkiisa isa qaadanayaayoo markaasuu iska baxsanayaa. Kitaab-gablow waxaa loo leeyahay, waa niman cabsidii diintu ku jirin waxna bartay dabadeedna dadka makastada ah khaldaya oo meelaha kan dabadeed qof xanuunsanayaa maku jiraa oo dhulkaas uun iska baarbaaranayaa oo ma haweenkaa midiba mid u tilmaamaya oon kaasoo kale jirinoo Alle mise siduu wax u yaqaano, dabadeedna beri baa caynkaasoo dabeed waa kaa. Naagta buu oranaayaa ninka iyo adiga ma isku wanaagsantihiinoo casharada qora oo caruur baan dabadeedna Ilaahay kuu weydiinayaa oo dabadeed wax u laablaabayaa oo tahliishu tufaa oo dhir buu sitaa tira badanoo kala wada noocoo kala soo baxayaa kiish yar wuxuu oranhayaa kaa shiido dabadeed markuu waxaan ku shaqeeyaa buu leeyahay kaas haddii aadan carruur iyo waxba lahayn addimada ku xira oo kaana dabadeed xiro marka aad mayrato jirkaaga meel iskaga xir dee waxaa dabadeed waxaasoo een habartu waxay tiri joogley ee Hargeysa ee waxaan oo kale ku shaqayn jiray, wax Allaale wixii aad qoonsato (Gabadhii ay qusayso) ee waxaad tiraahdaa xaajada iigu raara Xaaji Faadumo. Waxaana ku magac dheerahay bay tiri Fool-dheer xaafadda qurac dheerna Waan ku jiraayoo sida aan u bartay wax alla waxa kaa hor imaanaya ma ay jiraan. Gabadhii reer miyiga ahayd ninka reer magaalaha ah guursadaye habrihii dabadeed kuusha ruuxi jirayo kuwii foox foox shidi jiray iyo waxaad ogayd oo dabadeedna la yiri ninku ha kugu sii jeclaado, markaa dabadeedna dadka Kitaab-gablowga ah iyo kuwa Fooxa shidaya dabadeedna ka faaleeya oranaya dabadeedna qiiqu

| | |
|---|---|
| | waxaasuu sheegay iyo kuwa bunka intay kariyaan marka ay ka cabbaan fooraarinaya oo kalka ay foorariyaan heerka uu ka tago koobka sidaa oranaya oo inta uu dhameeyay intuu dhameeyay inta ay martay diillimihii saasuu sheegayaa oo waxyaabihii sidaa oo kale ahaa. |
| Axmed Nuur | Maxamed Cabdulle Xassan gabay buuka tiriyay Kitaab-gablow, masala gaab wadaad aa ku xusuusiye bal muxuu yiri? |
| Daahir Afqarshe | “Masala gaab wadaad ahi wuxuu macsiyeeystaaba-madiiddan akhrinaya wuxuu malab ku daaqaaba goorti muftiga loo tagaa mawdku ka adeegi” waa kaa cararay kaasuu ka cararay oo la soo sheegay. |
| Axmed Nuur | Anna waxaan xasuusnahay gabay la yiri ninkii la oran jiray Gaadataa-gaadataayoo waxaad tahay faallalow. Gaadataayoo waxaad tahay diin mataqaanaa kitaabka waxaad sidataa waxa la yiraahdo dayrabi, Gaadataayo waxaad tahay nin ma taqaanaa xilagubaad tahay naagaha waad eridaa. Gaadataayo bakhayl baa tahayoo waxaa ugu daliil ah in aad tahay bakhayl, goonaad degtaa markaasuu gabyay wuxuu Gaadataa yiri, Gadaashaana waa la yiraahdaa wuxuu yiri:<br>Deyrabi kitaab buu sitaa Diinta gabal weeye, Naagaha dila waa eryaa damac habaab weeye, Docdaasuu dawaarayn hayaa daaqsin badi weeye, Afartaa wixii lagu daraa xan iyo duuf weeye.<br>Marka usaga ninkaasaa lagu jaribihayaa Kitaab-gaablow uu ahaayoo kitaab-gaablowga Soomaalidu qaarkeeda wayba ka xanaaqdaayoo Kitaab-gaablow haddii la yiraahdo. Maxaad Fiqi Buraalow ku dari lahayd. |
| Fiqi Buraale | Ninkaan horta kitaab gaablow la yiraahdo, magac un baa u baxay kitaab gaablow carabtuba way tiraahdaa cashaan kitaabkan “Macsharalfalig”, macsharalfaligaas cashaan way ka faaliyaan oo faalkaas hadba wixii ka soo baxo ayay ilmeeyaan oo mooreeyaan oo isu minguuriyaan waa kow. Waxaana taas oo kale aniga aan ku arkay aniga oo Mombaasa jooga oo ay tahay saddex iyo afartankii (1943) yaa nin hindi ihi meel istaagay markaasaa annagoo ah dhowr aab u soo dhowaanoo annagoo u jeedna yuu wuxuu duuduubay maro macawiis ah, macawiisku markuu duuduubay sida dabashabeeliska carruurtu markay dhurwaa iska dhigaysoo ay dabada isaga xirto mara mara intay af dhuuban u samayso labadaa simood ku xirto sideedii ayuu u galay, annagu waanu u taagnahay markaas wuxuu yiri (Af aanan aqoon buu ku hadlay, hadba gees u jeedsadaa) Adigu ninkii wuxuu sameeyaba, indhaha naga sixiryaayaa wax kale cashaa sameeyayaa maradii waxay noqotay gunguma isku soconaya taa waan u soo taagnaa aniga. Waxaanu markaa u qaadanay ninkaan indhihiinu sixraye maradii isma bedelin, maradii buu misna soo qaatayoo sidii mas buu ka dhigatay oo saa u duuduubay oo saa u nuux-nuuxsanaya, horta taa waan soo joogay aniga. Mid kalena wada aragti baynu wada nahayo, nimanka kan riwaayadaha sameeya ee ama hindiga ka yimaada ama meel kale ka yimaada oo la yiraahda waa Bincalwaan Cadanna waan ku arkay, halkana waa ku arkay kuwaa Bincalwaanka waxay sameyaan toorey bay is geliyaan buc! Markaasay iska soo gurayaan xiidmihii saa u darandoorinhaya, dhiiggii baa ka soo boodaya dadkii oo saas u wada |

daawanaya yuu misna saa u dherbaaxayaa, wuxuu yiri waan ceshan hayaa indhuhuu sixrayaa baan iri. Waxaasu Soomaalidu waxay tirtiraahdaa haddaad akhrido markaas Yaasiinka aad akhrido waxaasu muuqan maayaan oo jiri maayaan baa la yiraahdaa. Waxaan kale oon joogay Shineemada Shineema Banaadir la yiraahdo nin yiri kusheertaan ka samaynayaa oo dadka aan sheegayay oo Hindigaas ah dad buu ukun ka soo daadiyay. Saacad buu nin ka kala jebinayaa hadhowna markaasuu ku xirayaa wuxuu ku xirayoo ma ogi. Waxaasoo dhan waxaa weeye waa wada sixir iyo indhaha la is dhaafsiyo, inkasta oo ay jirto wax turuuko la yiraahdo oo khayaanno la yiraahdo oo artiistaha uu leeyahay ninkan la yiraahdo kitaab gaablowga haddeynu u noqonno horta nin meel fog jira ma aha laakiin waxa weeyw nin xun oo waxaas aaminay oo ku isticmaala, ummadda diinta taqaanna aayan jeclayn lana tilmaamo oo la yiraahdo kaas waa sixirrow, kaas waa kitaab gablow, kaas waxaa weeye faalalow, kaas waxaa weeye mid xun lagu tilmaamo Shuruglow. Waxaa un la yiraahdaa waxwalba waxaa ka adag markaad tiraahdo ama Yaasiinka aad akhriso ama aad tiraahdo Bismilaahi Raxmaani Raxiim, hase ahaatee ninkaasu nin diintu jeceshahay ma aha ninkaas.

Axmed Nuur — Halka haddii aynu ku dhaafno ninka la yiraahdo kitaab gablowga wixiisi iyo sixirkiisi eraygaan la yiraahdo Shurug, shuruglow iyo fulaanful ama kuhaan bal maxaad oran lahayd Daahir Af Qarshow?

Daahir Afqarshe — Intoo dhami waa isku wada nooc ee qaarba magacu dadka u yaqaanaa waxaa lagu shaqaynayaana waa wax aynu ka soo hadalnay iyo inta aynaan gaarin oo wixii un baa dabadeed qofba si gooni ah u shaqaynayaa oo uu wax uga arkay, dadkiina dabadeed halkaa ku raacay oo halkii ka wadan hayaan hooshoodii oo raadsanaya Kitaab-gablowgii. Magacyada un baa kala duwanoo waa isku nooc qura.

Axmed Nuur — Shuruglow iyo faalallow iyo fulaanfulow maxay kala yihiin?

Fiqi Buraale — Magacyadaas iyaga ah, marka la yiraahdo Kuhaan waa magac meel buuna salka ku hayaa. Ninka la yiraahdo Fullanfullow sow ma ahayn magaciisa waa Kuhaan waa isku hal. Bel metal waxaa la sheegi jiray nimanka magacyadooda ma hayee; col baa duulahaya, culkuu ku duulahayaa yaa kuhaan yaqaanaa yaa faal yaqaanna; raggii baa la isku jarrabayaa ninka markaas ay isugu gudho yaa markaas la doontaa. Bel metal waxaa ka mid ah reerka kan halkan Afgooye dega iyo reeraha Marka dega ayaa waa colloobay. Qolaba waxay haystaan laba nin oo baas leh bey haystaan. Markaasaa waxaa la yiri: waxaanu yeelaynaa hee! Hebelow iyo hebelow waxaynu yeelaynaa nimankaas reer Afgooye way soo duulayaan (waa nimanka Geledi la yiraahdo) maxaynu yeelaynaa? Dee waa in nimankaas la iska celiyaa, waa tahay. Qara ii soo gura buu yiri. Qaarihii buu soo guray. Habeenimadii baa la tallaalay subaxiina wey soo baxeen qarihii. Nimankii ka duulay meesha la yiraahdo gelidi qarihii bey cuneen, markaasay wada seexdeen. Marka waa kuhaan, magaranaysaa cuskan sixirrow iyo Faallalow waxba cusguursha.

Axmed Nuur — Halkaas aynu ku dhaafnay ereyadaas. Waxaynu u gudbaynaa wax aan ka sii fagayn oo la yiraahdo Isdhaafid. Waxaynu maqalnaa hebel baa hebel la dhaafiyay. Sidee bay ku suura geli kartaa waxaas ma dhacaan? Ma maqasheen, maxay yihiin? Hebel baa hebel la dhaafshay. Hebel baa isagoo dhiman lahaa hebel lagu bedelay, wadaad hebel oo kitaab-gaablow ah baa helay. Marka innagoo aan ka eegaynin dhinaca xagga Diinta sida Ciisa ina yiriba, ayaanu waxaan u eegaynaa innagu siday fikraddeena ka qabno iyo dadku siduu u arkayo ninkaan ninka lagu beddelay oo la yiri, hebel oo dhiman lahaa baa hebel inta wax la tafaafulay wax la gowracay neef la qalay wax la sasameeyay, qardhaas la qoray, casharo la qorayoo ciid ciid la gedinayay oo geed la gooyay oo wax la qabqabtayoo wax la sameeyaba sixir iyo tafaaful shurug iyo belo wax kastaba la sameeyay, hebel baa hebel lagu bedelay oo hebel baa meeshii hebel ka dhiman lahaa dhintay. Taasna Daahir bal adna wax ka dheh wax ka geyso.

Daahir Afqarshe — Waan ka geysanayaa, arrinkaasuu horta waa la wada maqashiisan yahay wax qarsoon ma aha. Laakiin sidii aan warkii oo dhanba aan u sheegnay, Soomaali weyn meel meel un yar ma aha ee laguma dhaqmo cilmigaa. Soomaali weyn way ka tagtay ee waxay aqbashay culimadii oo ka warantay kanu in aanu bannaanayn oo marka dabadeed dadka ka bukoodo sadaqad iyo quraanka ayay ku daaweeyaan dabadeed sida ay diintooda u sheegtay. Laakiin marka aad timaado dhulkan webiyaashu u dhow yihiin iyo dhulka beeraleyda ah iyo waxyaalahaasoo hadba la tilmaamaa oo la yiraahdo waxyaalahani waa ay jiraan Soomaali weynse wuu ka dhex guuray waxyaalo saa o kale ah.

Axmed Nuur — Aan ku noqdo ee geedkaan la yiraahdo isdhaafinta, qolooyinka beeralayda ah iyo qoolooyinka xeebaleyda ah dadka magaalooyinka deggan ayuu horta aad ugu badan yahay ee waa runtaayoo, dadka xoolo dhaqatada ah waa uu ku yaryahay, sababta oo ah dadka waxyaalaha sameeya aalaba ma tagaan. Haddana waxa sameeya nimanka saldanooyinka haysta ayaa aalaaba sameeya. Waxaan sheeko ku maqlay, Boqor Cismaan baa wuxuu rabay dahabkiisii goortuu maqlay in Talyaanigu geedi ku soo yahay in uu aaso, markaasuu arla dhan xirmeeyay oo wuxuu yiri lana mari karo intuu askari dhigay. Markaasaa intuu wana la qalay iyo xoolo la qalay ee xoolihii raadkood qaar la lumay si kale la qasaasacay qaar meela laga sarsaray wax la yiri, Boqor Cismaan wuu tafaafulanhayaa. Wuxuu isugu rabaa tafaafulkaas uu ka rabaa suu dahabkiisa u aasilahaa oo dhulkaas uu ku aasanayn aan loo tegin. Markaasaa dhowr bilood aan la marin dhulkii dahabka uu aasayay aan la marin, dadkii oo dhan wada baqay, culima iyo caamaba la wada tegay oo xataa dadkii culimada aan moodaynu, ninka kan inuu wax kan uu sheegayaa iyo waxa kan ee culimadu ay sheegayaa ay yihiin tafaaful dhab ah, waxaa weeye wax la yiri ee wuxuu rabaa boqorku cimrigiisii baa soo gaabtayoo (marka lixdameeyo iyo meeshaasu jiray) inuu isku bedelo nin kal oo dadka la isku bedelee ha laga cararo. Markaasaa lagaba qaxayba oo dadkii oo dhan ka wada carareen. Haddaba aad baa runtaa weeye wey ku badan tahay ee Fiqi Buraalow adna maxaad ka oran lahayd?

Fiqi Buraale — Taa anigu waxaan ka oran lahaa horta ma maqal mise arag! Maqal waan maqlay. Waxaan u maqlay sheeko ahaan baan u maqlaayoo qof weli qof la dhaafiyay anigu indhahayga ma saarin, eraygaasu aad buu u ballaaran yahay. Waxaa la yiraahdaa, nin baa bukoonaya wadaad tafaafulogaasaa loogu yeerayaa, wadaadkii markuu meesha yimaado wuxuu oranhayaa kafan ii soo tola, kafantii baa la soo goynayaa, neef baa la qalayaa, waa la cucubayaa markaa la cucubo, neefkii oo la kafanay oo kafantaa lagu waxeeyay yaa la aasayaa baa la yiri. Kii markaas la aasay oo neefkaas loo waxeeyay waa qof kale qofkaas isma oga, wixii oo aasan waxna la sameeyay yaa neef kale oo la rabo garkiina wax lagu akhriyay yaa la siiyaa baa la yiri. Markaas ninka waa bogsanayaa baa la yiraahdaa kii waxa kan loo qabtayna waa dhintaa baa la yirahdaa (anigu indhahayga ma saarin ee sheekaan ku maqlay).

Axmed Nuur — Oo isdhaafisaa sidaasaa la yiraahdaa.

Fiqi Buraale — Haa qof qof la dhaafiyay weeye.

Axmed Nuur — Isdhaafiska waxaana isdhaafinahaya baad leedahay wadaadka kutuba rogay. Waxaad leedahay markuu kitaabka fiirsho wuxuu ku arkayaa oo yiri, waxaasaan arkayoo hebe hebel haddii la dhaafsho hebel waa bogsan doonaa.

Fiqi Buraale — Saasuu ku dhameynayaa.

Axmed Nuur — Saasuu ku dhamaynayaa. Aan ka gudubno isdhaafiska aan u gudubno waxa kan la yiraahdo ee Qataar, Qataarkaas wuxuu ku badan yahay beeralayda, waa wax caan ah, Soomaaloo dhami way wada maqashaa waa la yaqaan. Aad baa looga cabsoodaa. Wiil baa gabar jeclaanayaa baa la yiri, markuu gabadha uu jeclaado haddii gabadha yari ku diiddo oo ay gabadha wiilkaa diiddo, ninkaa qataarka sameeya ayuu u tagayaa geed buu soo qaadayaa, geedka qodax buu ka soo qaadayaa, geedkuu wax ku mudayaa, geedkaasuu qataarayaa. Qofkii gabadhi uu jeclaa halkaasay qayla in uu ka aarsado uu rabana saas buu u galayaa baa la yiri. Marka qataarku cilmigaas ayay ku sheegaan. Daahir Afqarshow maxaad qataarku, maxaad ka maqashay maxaad u malaynaysaa maxaad u arkaysaa?

Daahir Afqarshe — Waxaan u arkayaa. Horta aniga weligay ma aanan aqoon illa aan imid Banaadir Soomaali weynta kalena badi ma taqaan saan markii horeba kuu tilmaamay waxyaalaha dhan waxay ku badan yihiin webiga jiinkiisa iyo beeralayda iyo xeebaha. Waxoo dhanna cilmigii baa kala jaad ahoo waa isku wada madaan weligiiba lagu soo dhaqmayay oo waxna lagu layn jiray, waxna lagu raadinayay, wax jirana wuu yahay. Cilmiyaasha aynu ka sheekaynaynaa wax jirana weeye. Kii hore aynu ka baxaynay waxaa iigu war dambeeyay oo imminkana laga macaamiloodaa oo laakiin aad loogu sheekayn jiray, kitaab xeebaha ka yimid oo Nugaal tagay oo la yiraahdo Warrame' oo yarad loo qaatay niman wadaadda ah markay arkeen in lagu dhaqmi karayo oo uu yahay kitaab wax weyn taraya. Sheekooyinkiisuna ballaaran yihiin sida wax loogu soo dhexsaaray, yaa ninkii haystay, nin bukan loogu yeeray oo uu

jecelyahay, markaasuu wax markaasuu wax u sameeyay wadaadkii. Markuu hawshii dhameeyay buu iska tagay – wadaadka faras buu ku joogay ee gurigiisii buu iska qabtay. Qola kale oo doonaysa gurigiisii intay tagtay, Illa waa illa noo doon wiilkiisii curad. Wiilkiisii curad oo u ordi sheekh meesha u ku maqan yahay iyaa garabkii uu sheegaayay Fiqi Buraale oo loo diyaar gareeyay (ruuxa idinku soo horreeyo siiya) iyaa wiilkiisa curad la siiyay. Wiilkii halkii buu ku xijaabtay. Kitaabkii ka dambow laguma shaqaysan oo wax dambe laguma qaban oo haddeer Warqabaana la yiraahdaa ninka waan aqaannaa, kitaab meel weyn markii hore lagu qaadan jiray wuu ahaa haddeerna waa laga baqay oo meel buu yaallaa.

Axmed Nuur — Warqabow waaba yaallaa?

Daahir Afqarshe — Warqabow waa yaallaa, dhulkanaana laga sameeyay oo markii ka tegay.

Axmed Nuur — Oo waa far guri!

Daahir Afqarshe — Waa far guri gacan.

Axmed Nuur — Alley lehe aniguna berigaa waa ku maqli jiray kitaab la yiraahdo oo kutuba laga soo guuriyay yar yar oo far guri ah oo meelaha kan Banaadir ayaa laga sameeyay culimada Banaadir baa samaysay waa maqli jiray oo reer barigaas mar marka qaarkiisa haysan jirayoo nimanka waxaas ku dhaqma ayaa haysta.

Daahir Afqarshe — Wax kaloo ku tusayaa, oo kitaabtaa lagu sameeyay. Nugaal xoolaa laga qaaday Dhuur. Arrin weyn oo Barigaa ka dhacayna weeye Nugaal illaa xeeb oo la wadaa yaqaana weeye, ninkii baa loo tegay oo wadaadka ahaa oo waxa la yiri haddaadan adi iyo kitaabkaagii warqabe aydan wax qaban dee waa idinka. Raggii joogay meel walba waxay yiraahdeen ma kaga baqanna col nugaaleed halka kan. Haah! Baa la yiri. Falkii sheekh Samantar (Illayn isaga iyo kitaabkiisiba waa laga warhaayey Warqabe oo Fiqi Samantar haysto) iyo dal aqoontii Dalcasar iyo talaxumadii Muusa Hayi. Ninkii meesha ka madax ahaa miyaan kaga baqannaa. Saddexdii nin baa la isu geeyay arrintii, waa la isla helay waxaa la yiri farduhu yay naga sii curyaanoobin (Way na geeyaan inagamase soo celiyaan) baa la yiri ninwaloo laba neef kaxayso. Ninkii wadaadka ahaa wuxuu yiri Anigu waxaad iga taqaaniin inaad socotaan keliya. Wuxuu wax ku qabtay cidaaddii aynu wax ku cidaadan jirnay ee marada ahayd ee madoobeyd. Qarqarihii uu wax ku qaadan jiray saabkii iyo waxaasu ku riday. Waa la iska tegay. Dhowr casha ah habeen la gudayay, maalintii dambe ayaa la degay ee meeshii la doonaayay noobiri gutadan aad maqasheena iyada waa loo shuluud Noobiri inay shaxi ka jeexnaydee, waad taqaanaa labadeena guri yayba ka dhex dhacday. Waa sheeko caan ah ee la ogyahay oo waxaa dabadeed waxaa khayaalka ahna lagu diidayaa diinteenuna ayaan ogolayn ee waa wax cilmi ah oo jira. Dabeed xoolihii la soo kaxeeyaad ogtahay, ninkii dabadeed gabyahayey oo shaacirka waa kii yiri: Marka dhalin yarad faraskeedii waa kan la diray, col weynihii iyo

duqowdii waa kuwa iska tagay waa kan ninka dufleyda ah oo weysadaa ii soo dar badda. Badda sharafkay ina soo badday waa halkaa aynu sheegi. Sheekadeedii waa kaa la wada sheegi, labadeena guri waa tay ka dhex dhacdayba. Kitaabkii caynkaas ahaa ee laga soo guuriyay cidaadna maantaa waxaa samaynaysay ee warqabe ahaa waa la hayaa.

Axmed Nuur	Warqabe wadaadkii awoowihiisa hayn jiray iyaa inala jooga Fiqi Buraale weeye, bal Fiqi Buraalow intaad ka warqabto ka warran?

Daahir Afqarshe	Fiqiburaale awowgiisaa sameeyay baan u maleeynayaa dee.

Axmed Nuur	Awoowgiisuu ahaa sida uu shegayo.

Fiqi Buraale	Waxaase la yiri horta been fakatay runi ma gaarto. Bal waxaad iska niyaysataan, aanu waxaan anigu qabaa waxa kan horta ha jireen, laakiin wax walba sida ay niyadaadu tahay noqoto ayaan anigu qabaa. Sababtu waxay tahay haddii adiga oo gurigaaga jooga oo naagtaadu ayan fal aqoon, oo carruurtaadu fal aqoon oo wadaad laga shakisan yahay uusan iman soorta laguu soo dhigay ka wiswisto oo shakiba kaa galo “horta waad sixrantaa” haye iska daa! Waa saan anigu qabo. Haddaad socoto oo adiga oo soconaya meel dariiq ah oo aad mari lahayd aad ka shakido haddee col baaba jooga ee waxaa la yiri waad ka shakiday iska daa waa lagugu dilayaayee. Haddiise aadan ka shakinin oo meesha shaki uusan kaaga jirin Boqolaal kun haddii ay fadhiyaan waxba ku gaari maayaan. (Waan jarribay anigu). Haddaba waxaa la yiraahdaa tan kale ee aad ka sheekaynaysid, haddaan u soo noqdo waranka waxaa la yiraahdaa Qataar. Waasay yiraahdaa nimanka falikiga sameeya, dadka aad arkayso qof weliba geed buu leeyahay, qof weliba geed buu leeyahay oo la buruud ah oo laha leeyahay, waa tan la yiraahdaa, marka uu qoku dhintana caleenyihiisa soo dhacdaa. Soomaaliduna waxay tiraahdaa caleentiisa hebel caddaatay markii wax lagu arko. Marka waxaa la yiri inta kitaabada saa u fiiriyaan ayay ninka buruudkiisa eegan, ninku ma ciid baa laga abuuray? Ma waxaa laga abuuray, ma dabayl baa laga abuuray? Ma waxaa laga abuuray dab? Markay intaa hubsadaan yay geedkii raadkiisa misna doonaan. Markaas ayay geedkaas inta ay soo qaadaan bey mindi ku taagaan, geedka waa dhawaaqayaa isagana meeshii baa nabar isaga taagayaa (sheekaan ku maqlay). Laakiin waxay ka dhacdaa warankaas wixii halka dhooboyda ah eed ma dhacaan halkaa laguma yaqaan. Kan Fiqi Samantar xaggiisa ah waa jiray (aniga awoegay weeye). Waxaa jirtay nin Cali Axmed la oranjiray oo aynu ina adeer saddexaad nahay yaa habeen la maray (anigu taa waan joogay) habeen baa la maray, markaasaa la yiri Fiqi Samantar ha loo yeero, Fiqi Samantar markaa ma joogo ee waxaa jooga walaalkii oo la oran jiray Sheekh Nuur, markaasaa la yiri Sheekh Nuur ha loo yeero ninka xaalkiisa la bixin waayayee, waa wankaa hebel la yiraahdo soo qabta buu yiri wan galaalan baa la soo qabtay. Aniga waan joogaa markaa. Wax buu akhriyay, markuu akhriyay wankii waa la gowracay inta la qaaday baa bannaan halkaas ah la geeyay. Gorgor geel toosiya la eg ama ka sii weyn uu! Uu! Uu! Inta u soo yiri qaatay wankii

gebigiisiba (cidi dheer buu lahaa). Markuu qaatay uu la tagay yaa ninkiina toosay taa waan arkay aniga laakiin wuxuu akhriyay wax kama haysaan.

Axmed Nuur — Kitaabkii Warqabe la oran jiray oo kaaya isku laayay wadaadka la oran jiray kitaabkii cal naga qaaday weeye, waxba ma leh, ka dabatag bay leedahay ee ka hortaag ma leh kitaabka. Waxaa la yiri, kitaabkaas waxaa la yiri waxaa laga qoray Benaadir, laakiin markii dambeeto wuxuu tagay Nugaal, Nugaalna Bari buu ka sii aaday, aad iyo aad Warqabe kitaabkaa la oran jiray Fiqi Samantar kitaabkaas buu haynjiray ee waa kitaab caan ah oo wadanka inta badan waa ku caan.
Aan Qataarka dib ugu noqonnee. Qataarku horta waa wax la yiri waa cilmi aad iyo aad u yaab badan ee dadka yaqaanina ama dadkii laga sameeyay arkayna way rumeynayaan. Dadkii lagu sameeyay qaarkood waxay leeyihiin waa dhab ilaa geedkii laga bixiyay ama mismaarkii wixii la geliyay laga bixiyo bogsanmaayo yaa la yiri, Afgooyadan, reer Afgooyaa aad iyo aad ugu dhaqma, ee Wallahi qataar baan kugu taagayaana waa la yiraahdaa, waa aan dhoobaydaa ka shaqayn jiray.Asmagan aan uga gudubno, qatarka bal Ciisow adiguna dhinacaaga maxaad ka oran lahayd?

Ciise — Ee Qataarka sida uu u sheegayay Fiqiburaale sidooduba waxay runmaysan yihiin ama yaqaaniin in ruux walba uu leeyahay geed isaga mataan u ahoo qofkaas inta uu ka xanuunsado - la xanuunsada, wuxuu jaclaystaa, wuxuu necbaystaa – necbeestaa ayuu qabaa ruux waliba ayay rumaysan yihiin. Waxaa lagu sameeyaana waa webiyada agagaarkooda ee ayaa laga yaqaanaa. Anigu waxaan ee waayo arag u ahaa ee aan u soo joogay magaala Kismaayood, nin ka shaqayn jiray dekedda magaalada Kismaayood ahna dadkan reer goleedka ahaa oo diris aan ahayn, ayaa goor galab casarkii ah shaqo ka yimid, gurigiina markuu yimid ayaa labadaa feerood isu yimaadeen xiq, xiq, xiq, ninkii wuu neefsan waayay, waa 66dii, wuxuu rafto, rafto oo rafto, qof ay qaraabe ahaayeen ayaa loogu yeeray. Nimankii way isla garteen ninka cudurka hayaa in uu yahay waxaa aynu sheegayno oo qataarka ah. Wey baxeen, magaalada marka baabuur yar yar oo tagaasi ah kuma badnayn. Waxay qateen baabuur weyn ayay ijarteen. Waxay la soo aadeen magaalada Jilib. Subixii dambe, barqadii goor ay tahay (habeenkii oo dhan suu u rafanayay) barqadii goor dambe ah, malaha kow iyo tobanka meelaha ay tahay ayaa ninkii la daayay oo miirsaday dhinac u dhacay intuu neefsaday dhinac u dhacay. Nimankii habeenkii dambe ayay soo hoydeen (habeenkii ay dheelmadeen habeenkii xigay). Waxay yiraahdeen nimankii ma lagu daayay saacaddaas iyo saacaddaas markay ahayd xanuunkii ma ku daayay, haa buu yiri ninkii, waa lagu qataaray geedkii baan ka bixinay musmaar ku taagnaa. Ninka la kaxaynayo oo baxaya ee oday wuxuu aha Aw Diinle la yiraahdo oo subax Jimcada caado lahaa, wuxuu yeelaa bun buu marsadaa, jirkiisa oo dhan buu mariyaa, ilna wuu la’aa odaygu isaga naftiisa dekadda ayuu ka shaqayn jiray subaxaa jimcaad xataa haddey shaqo jirto ma aadaynin. Bun buu marsanayaa ciiddu ku galgalayaa (waa bacaad magaaladu) waa magaala xeebeed qorraxdaasuu fariisanayaa isaga oo bunkaa marsaday. Ciiddaa ku galgashay oo ruquuskaa leh hadduu

| | |
|---|---|
| | kaa hor yimaado meeshaad joogtaba waad isku kaadinaysaa, odaygu sida uu u yaallo. |
| Axmed Nuur | Wax ma guntan yahay? |
| Ciise | Wax uu guntan yahay dharkiisii caadiga ahaa buu guntan yahay. Xataa wuxuu qaadanayaa garan (funaanadan gacmaha go'an) iyo hoos gunti ayuu sittaa, kama fogaado gurigiisa iyo agagaarkiisa oo magaalada ma dhex galo marka uu sidaan yeelay. Goor duhurkii meelahaas markii la gaaro nin iska dukado run ahaan waa iska meyrayaa salaaddiisa jimcuhuu aadayaa. Caadina wadaadada subax jimce sidaa bey yeelaan. Anigu midda ayaan goob-joog u ahaa, Jubbada hoose aad baa looga yaqaan loogana cabsadaa, waxyaalaha sixir marka la yiraah kowaad oo la tilmaama ayaayna ka mid tahay. |
| Axmed Nuur | Waa run Ciise horta waayo aragnimo weyn baad u leedahay qataarka, qataarkuna waa wax yaab leh. Anigu ruuxayga dad badan oo iiga sheekeeyay ayaan aan joogay Shabeellada Hoose waa wax yaab leh aad baa loo rumaynayaa marka reer Goleed iyo, reer dhoobeyda ah waxay u arkayaan inuu wax jira yahay waana laga cabsadaa aad iyaana looga cabsadaa. Ninkaan qataarlaha ahna waxaa la yiraahdaa geeda gooyo, geeda gooyo ayuu yaqaanaa ama wuxuu yaqaanaa geedsaar, wax buu geed saaraa ayay dhahaan. Aan ka sii gudubno ee wax la yiraahdo Asmagan. Asmaganku kama foga iyaduna iyo dhaaw, bhaw wax la yiraahdo. Asmaganka marka iyada ruuxeeda waa wax la aaminsan yahay. Waa suurtowdaa inay ka duwan tahay sixirka laakiin iyada ruxeedu aad bey uga baqaaniin oo wey baasaystaaniin ninka Asmaganka yaqaan. Dadka asmaganka yaqaan iyo Asmada waxay tahay Daahir Afqarshow ku horrey. |
| Daahir Afqarshe | Asmaganka aniga waxaan u fahamsanahy inuu sixirkii hore uu la mid yahay ee magacu kala duwan yahay. Sida loo yaqaanaa noocya badan ay tahay, markaa asmadanu waa wax yaalaha uun dadka lagu kharribayo ee weligoodba raf ku samaysanayay ee ragna ka haray e rabi yiri kaga amaan heli maysid haddii aad waxaan ku macaamilooto, ragna weli caqli xumo awadood uu ula joogo qurusna ka deyayo wixii magarahaysaa kolkaa abyadeena uu leeyahay kaga aarso oo dabadeedna ilma ahaan maayee qofkii ileyn waa ika dabargo' lahayee, qof weliba qof alaale ka sii baranayo weli oo cilmigii inuu jiro aan isla wada oggolaanay yeey waxaanu ka yimaadeen, magacyadoodaana way kala leeyihiin, sida war looga qabanayaana waa kala gaar gaar, sida aniga aan ugu muuqdaa saa weeye. Dhowda wax la yiraahdo iyadu taasi way ka duwan tahay oo waxaan u aqanaa "nin hadalkiisa qabuul ku leh oo haddii uu wax habaarana laga aqbalo haddii uu duceeyana laga aqbalo".<br>Taa culimadeena oo tafaafulka aqoonin yaa iska leh oo wax karaamo ay iyada iska leedahay oo waa sharaf Ilaahay siiyay oo ay diinta ka dhex helaan oo waa kaa Sayid Maxamedba ku leh: Culimada waxa loo quweeyu waa qobiyo dhawe" "waxa munaafuq loo quursadaa qoola beenta ahe" Deetana Munaafaq kama taggane kan diintii wax ku sixray wax ku leeynayaana waa munaafuq. Kuwii Ilaahay qabka siiyayna waa |

kuwa Ilaahay baryay oo ka aqbalay. Haddii ay cadowga imminka Xabashada aynu dagaalamayno ka soo qaad waa kan imminka masaajiddada ay kaga ganayaan Quraanka. Markaa dabadeed Quraankii dabadeede sheegaya sida cadowga loogu leeynayo, noo baneynayo inuu ma aragtay kolkaas yahay in Ilaah loo cuskado, wixii aad ka baqato ka magan gasho ee wixii aad ka doonnaysidna Ilaah aad magan gasho oo aad weydiisato.

Fiqi Buraale — Asmadan baan kaaga warameyaa. Horta waxaa la yiri magaca iyo masiibaba maalin bay baxaan waxaa kaloo oo la yiraahdaa, “laga barayba laga badi” oo annagu waxa kan culimadaaba ku isticmaali jirtay Banaadir un bay ka qaadeenee waxa ay halka ka soo abuureen ma ahayn, waa tan kale la yiraahdaa “hantaa la iska dhacayee, hibo Eebbe ku siiyay habeen la iskama qaado”. Marka ee taas halkaa kaga haro – erayadaad igu soo bixisay oo aan u noqonno tii aynu faalaynaynin labaddii arrin waxaa weeye Dhaw iyo Asme, Asmo waxaa la yiraahdaa horta marka la sameeynaayo la yiri “lug baa lagu istaagaa” markaasaa xagga jihada loo jeestaa, Asmada Suuraddii ruuxeedii yaa la akhriyaa maxaa yeelay gaalada waxaa lagu akhriyaa baa la yiri “Suuratul Al-Ancaam” yaa lagu akhriyaa markaad Suuratul al-ancam aad akhrido iyo Suuratul Al-Bara labadaa aad akhrido kun Yaasiin haddii la raaciyo gaaladu way jabaysaa. Sida calaashan qaalibka la yiraahdo ee Islaamka se nin Ilaahay ka yaabiya kuma akhriyo Asmo islaamku, maxaa yeelay way gubaysaa qofku. Dekan–dekan bay ka dhigaysaa haddii lagu akhriyo. Marka asmadaasu waa wax quraanka ku dhexjira Suurad weeye dhan ee ma aha Faallalow weeye ma aha. Waxaa weeye suurad loo qaybiyay in ay wax gubto oo loo kala qaybiyay Islaamka iyo gaalada, Islaamkuna si gooni ah loogu isticmaalo, gaaladana si gooni ah loogu isticmaalo saan anigu sheeko ku maqlay. Laakiin iyadoo la samaynayaa markaa la wado nid waan arkay midda calaashaan gaalada xaggeeda la leeyahay halagu akhriyo “Suratul Al-Ancaam iyo Suuratul Al-Baraa” ha lagu akhriyo haddaaba masaajiddada lagu yirahdaa. Laakiin tan kale sheeko waxaan ku maqlay, marka la akhriyaayo qofka waa in uu xagga jihada u jeesta, lugna uu isku taagaa, lugtaa bidixda ah uu isku taago tan midigta ah kor uu qaad. Ninkaasuna uusan ka yarayn afartan waa in ay wax u dheer yihin. Nin yar ma akhriyi karo afartan iyo wixii sarreeyo un baa akhrin kara haddii kale isagaa guban haya haddii uu akhriyo, sida la yiraahdo intaas un baan sheeko kaga maqlay.

Axmed Nuur — Waa runoo bal waxa kan la yiraahdo asmadu iyo dhawdu waa sida Daahir Afqarshaba u kala saaray waxay ahayd ee waa kala geddisan yihiin. Asmadu waa Quraan la gamayo oo lagu gamayo cadow lagu gamayo, Quraankana laga soo saara wey ka geddisan tahay Faalka. Dhowduna waa gob oo nin Ilaahay gob siiyay ilaahay karaameeyay ayuu noqonayaa oo qab leh. Waxaa jale oo qabtaa la yiraahdaa Afkuleebe, Afkuleeblana waa la yiraahdaa oo qofbaa wuxuu habaaro ama uu u duceeyo waxaas dhanba dhacaan oo Afkuleeblahaasna waa la yiraahda “Qoftiisu way kacdaa sheekhaas” iyaa la yiraahdaa. Kaa halkan aan kaga baxno, oo aan u sii gudubno erayga shanaad oo ah Saanqaad. Raad qaad, raadgur, saangur. Erayadanoocaas ah bal

| | |
|---|---|
| | Daahir Af-qarshow maxaad ka oran lahayd ama adaaba raad gur yiraanba moodayaayee? |
| Daahir Afqarshe | Raadgurka waxaan arkay iyada oo lagu akhriyayo libaax waa kan gardarada badan leh, markaa, waxa imminka aan ka soo sheekaynay oo dhamina waa wax diinteena laga wada dhex helay, dabadeed waxaa arkay culimadii oo camuud ka qaadaysa raadkii midna dhaafaysa (talantaali uga qaadaysa) wax ku akhriyaysa dabadeedna haddii uu raadkiisa meel un beyaan ah laga helo oo sidaa loo sameeyo la ogaaday in uu Ilaahay kaxaynaayo oo uu iska soconaayo bahalku iska soconaayo oo arladiiba ka tagayo. Tuugga iyo dadka caynkaas oo kale ah oo ayaguna edeb darada wata waa la mid. Raad-qaadka waxaa looga jeedaa waa noocaas aan soo sheegnay weeye. |
| Axmed Nuur | Marka la raad qaado maxaa ku dhacaya ninka? |
| Daahir Afqarshe | Waxaa ku dhacaya dabadeed ama masiiba heleysa, illayn isagiiba waa daalinkaase oo dabadeed kaas waa kan Quraanka lagula dagaalmaya, daalin weeye, diinta in lagula dagaallamo yay dabadeed tusaysaa isagana arladaba waa ka tagayaa. |
| Axmed Nuur | Waxa kale la yiraah Afturka maxay tahay, Aftur? |
| Daahir Afqarshe | Afturkaas waxaa weeye afkiisii baa la xirayoo in uu halkaas wax calaf ka helin libaaxaasu yay ka daawo tahay. |
| Axmed Nuur | Waxaa aynu uga gudubnaa ee midda la yiraahdo raadqaadkii iyo wixii la oran jiray saanqaad iyo erayada noocaas ah ee aan ugu sii gudubno waxa iyaduna la yiraahdo Maryameey. Maryameyntu Aw Daahirow sidee baa loogu dhaqmaa, yaa ku dhaqma, maxaa dadku ictiqaadsan yahay? Sideebuu dadku u arkayaa, maxay tahay? Waxtarkeedu muxuu yahay? Maxaa lagu qabtaa Maryamadu? |
| Daahir Afqarshe | Maryameeyntu waa ii maanta bal adaa nin xeebeed ahaaye ma waxay tahay kuusha la ruxayo ma illayn magacaanan hore u maqale. Haddii ay tahay Maryamayntu sida aan u malaynayo kuusha la ruxayo amase aleelaha afarta ah ee la rogayo qababax laga siinayo sidii debkii Dul iyo Dhaabax iisu rogaya. |
| Axmed Nuur | Aleela tuur kow dheh iyo maryameyn way isu dhow yihiin wax yar waxoogaa ah bay ku kala geddisan yihiin, marka waxaan u dhiibayaa nin la yiraahdo Fiqi Buraale oo ah ninkii looga ijaasa qaadan jiray aahay bal wad. |
| Fiqi Buraale | Horta Maryameyn marka la yirahdo iyo Aleel-tuur marka la yiraahdo waxaa iyada raacsan ilma ay iyada dhashay weeye. Haddee aleeshaa la tuuraya iyo turub laga faaliyo oo la yiraahdo gabadha Raanida agteeda halaga dayo iyo waxaa horta waxaaa dhashay Maryamynta. Haddaba Maryameyntu ragga un faaliya oo nimankaa ayuu eegaa, haweenkana way Maryameeyaan, marka Maryameyntaa inta ay saan u qabtaan iyagu, meesha raggu calaashaan tiriyo oo minguuriyo ayaku |

saasay u qabtaan waxay yiraahdaan: Halkaa dhac, halkaa jab, run sheeg, faal Allow run sheeg. Weliba waxaa lagu barbargaamaa kuushu ma socotee idinkaa dhaqdhaqaajiya suxullada. Marka maryameyn saasaa la yiraahday oo wax un bey calashaan sheegaan, waxna run bey noqdaan waxna been.

| | |
|---|---|
| Ciise | Siibood soo bood boggayga taabo. Waxyaala saas ah bey tiriyaan. |
| Axmed Nuur | Ciisana waa foolfooshan ninkii ka qayb gali jiraaba joogee. Anigu ruuxayga barbarkaygu waxbaan ka maqlay waxa weeye “Tusbax baa la qaadayaa ama marmar dheelkuul, ama wax saxan bay saa u qaadayaan ama marmar dhiil bay qaadayaan markaasay waxay oran hayaan saasay u ruxayaan markaasay waxay tahay Maryameyn. Waa runtaayoo raggana wey faaliyaan haweenkana wey maryameeyaan oo naaguhuu haweenku ma faaliyaan, sida faalka oo kale buu u dhowyahayoo aniga ayaa la fadhin jiray oo marka waxyaalo ay akhriyaaniin baa jira oo laakiin nin weligii ka qayb geli jiray baa jira oo ciisow maxaad ka xasuusantahay erayadii la oranjiray waxaas? |
| Ciise | Sida loo sheegay Maryameyntu waa falkii dumarka. Raggu wuu faaliyaa dumarkuna way maryameeyaan; qaar tusbax ayay lululaan, qaar kuul ayay lululaan, qaar waxaan arkay dhiil yar lula. Waxyaalahaas oo dhan haddii ay waayaan waxyaalaha ay yiraahdaan waxaa ka mid ah; Sii bood bogayga soo dhaqdhaqaaqa waxaasu uu samaynay shaygaas uu sakeeyo wax kaga qiyaas qaadanayo ee ka tilmaamaya wixii la warsaday ama wixii laga doonay inta tilmaan ka qaataan dhaqdhaqaaqa waxaasi sameeynayaan. |
| Axmed Nuur | Mid kale ee aan ka fogayn baan soo xasuustay, saa waxaa la yiri: markii wax laguu sheego baad xasuusataa. Waxaa jira xarig lagu xiro Ibriiq ama Ibriiq-fiirin ama Kurraas-fiirin, kurraas, geedkaan kurraaska ah la fiiriya ayaa jira oo iyaduna laga faaliyo oo kaa ku dhow. Aleel tuuridda iyo kurraas fiirinta sideeba loogu dhaqmaa, yaa ku dhaqma? Bal iyadana Daahir Afqarshe aan ku noqdo. |
| Daahir Afqarshe | Waxa weeye waxa oo dhami, meelba si baa looga yaqaannaa, qaarna ragga ku macaamilooda, qaarna haweenka. Waxaba kale oo jira qaar faalka rogayo oo midka u soo haraya kaga bilaabaya Maxamed, Cali, Abuu Jahal. Mirka xiga dabadeed haddii saa la yiraahdo, Maxamed baa xigaya. Haddii Maxamed soo haro oo saddex goor uu saa u rog-rogo oo saddex Maxamed soo haraan magacii nebiga yuu helay oo markaa dabadeed wixii sida kuwa faaliya ay yiraahdaan “saddax xarig ninka aamini waaya Ilaahna ma aamino” marka ay kuu faalinayaan faal noocaas ah baa jira, haddii ay saddex Cali ay soo haraan waa Sayid Cali oo waa mabruuk wixii la doonayay. Saddex Abuu-Jahal haddii ay soo haraan waad kharaabaysaa haddii ay midhis ay isku noqdaan dhana xoog ma yeelan. Waxaan aad arkaysid waa wax jirrabaadi ku jirta marmarka qaarkoodna dabadeed caqligaada ku siinayo. Dee waxaan kan waa wax ma aragtay caqliga geli kara. |
| Axmed Nuur | Daahirow ee waxa kan la yiraahdo aan garanee, caynatuuridda weynu |

garanaye aleelay tuuraanoo, afar bey u dhaanoo, haweenka ku dhaqma oo markii saa loo tuurna bey tiriyaan, hadba wax bey tiriyaan hadba wax bey ku soo saaraan wixii muraadkii aad weydiisatay ama wixii aad baasaysanaysay ama waxay doonaysay ay halkaa ka arkaan dabadeed wax bey sheegaan. Kuwo waa kuwa fooxa shida raggana waa qayb galaa oo fooxbay shidaan. Wax kaleeto oo jira wax la yiraahdo kurraas iyo la yiraahdaa oo dadka wax xado oo tuugada ah ayaa kurraas la xiraa, kurraas-xir baa la yiraahdaa. Kurraas baa labada dhinac laga xirayaa (kuraasta waa kuradda biyaha Masaajiddaada looga shubto kurraas xirta wax kale oo la yiraahdaa Ibriiqxir. Ibriiqxir baala yiraahdaa, markaasaa labada dhinac laga xiraa, laba nin baa saa loogu dhibaa labada gees bey ka qabtaan. Ibriiqaa geeska bidix baa loo jeedshaa. Marka wax baa la akhriyaa, waxay akhriyaaniin waa soo wareegtaa, hadduu wareego, nin magaciisa lagu ridaa ninkii Ibriiqaa magaciisa la wareego ayaa wixii qaba baa la yiri. Bal raggii ku shaqayn jirayna nin baa in kala joogee maxaa Fiqi Buraalow oran lahayd? Ibriiqxirka Aleel tuurka, bal waxyaalahaa no kala saar.

Fiqi Buraale — Ninkaas la yiraahdo Ibriiqxirka iyo aleeltuurka saan aniga u maqlay, horta Ibriiqakanu waxaan tuug ahayn laguma sameeyaa la yiri. Marka wax la xado oo waxaas meel loo saaro la waayo laakiin dad la tuhmo ayaa dad badan la isku soo kiciyaa markaa dadkaa badan la isku kiciyay Ibriiqaasaa markaa biyo lagu shubaa, laba xarig baa lagu kala xiraa marka wax baa lagu akhriyaa. Mid ninkii wax xaday yuuba daba galaa, midna saasaa loo hayaayoo hadba ninka wax xaday meesha uu jiro ayuu afkiisa u jeestaa. Mid kale ee ka horreyn jirtay baa jirta, waagii hore waxaa jiri jiray wax deb la yiraaha, deb baa la shidi jiray, debkaa marka la shido oo tuug loola dan leeyahay, ama nin wax lagu tuhmay oo aan markhaati loo haynin yaa debkaa la shidi jiray haddaad run sheegayso ku dhaaro debkan. Debkaasuu marka mari jiray. Debkaasu markuu maro haddii uusan wax qabinna debkaas waxba yeeli maayo, haddii uu wax qabana debkaasaa gubaya, taasna waa la sameyn jiray ee waxay ahayd jiribaadihii hore ay ahaayeen laakiin ruuxaygu waxaan ku arkay Cadan dhexdeeda Aleel tuuridda. Haweenkaasu guri bey fariistaan kuraasi bey dhigtaan oo wuxuu in ay run yihiin iyo in ayan run ahayn kala garan mayno iyaga jarribaa iyo ma jarribinaa war kama haayo, hase ahaatee Aleeltuuriddan waxa u badan had iyo goor ku xiriirsan naaga naaga u taga iyo nin naaga jecel yaa u taga ee faal caan ahee weyn ee la isla yaqaana ma aha. Haddaba waxaan arkay naaga badan oo aleesha tuuraya oo la yiraahdo hebla inoo geeya ha inoo aleela tuurtee.
Turubka ruxiisu dhowr bey tuuraan, Raanida iyo Qulaanka iyo baashiga iyay tuuraan. Markaas gabadhu si noqoto wax bey ku sheegaan. Baashigu haddii uu si noqdo wax bey un ku sheegaan, qulaankuna waa la mid wax bey un ku sheegaan.

Axmed Nuur — Oo waa shuqul haween baad leedahay?

Fiqi Buraale — Haa! Waa shuqul haween baan leeyahay. Ibriiq isagu waa ka gooni ee tuugada ayaa iska leh.

Axmed Nuur — Bal ibriiqa, ibriiq xirridda, ama kuus-xirrida ama aleel tuuridda labada Ciisow adiguna maxaad ka oran lahayd? Illayn waayo arag baad u tahay ruuxaagu, raggii tuuri jiray baad ka mid tahayee.

Ciise — Anigu ma arag midda ibriiqa ah, laakiin waa isla iyadii oo ka duwan baan arkay waayo araggiisuna ahaa oo Jubbada Hoose laga isticmaalaa. Waa maxay? Haddii tuugadan nin tuhmo qof in uu wax xaday qof markhaati ahna loo helin sida uu sheegay Fiqi Buraale**.** Waxaa la yeelaa dad badan ayaa la isa soo uruuriyaa, wax la cuno oo raashin ah ama rooti ha noqdo ama canjeela ha noqoto ayaa wax lagu soo akhriyaa, waxaa la yiraahdaa dadka meesha isugu yimid ruux walba mar hee cantuugo (ha goosto) ruuxa tuugada galay, afka markuu gashado ee laq uu maago wuu ku joogsanayaa. Ruuxa uu raashinkaasu ku joogsaday ayaa wixii loo qabsadaa oo waa marag ma doonto dadka oo idilna waa wada rumaysan yahay marba haddii aad liqi weyso in aad adigu tahay ruuxa wax xaday, middaan waan soo arkay. Tii dabkana oo isagana i xasuusiyay Fiqi Buraale. Mar goobjoog uma ahayn laakiin midbaa la iiga sheekeeyay. Ninkii sameeyay baan aqaan. Nin ahaa Ugaas ayuu wuxuu guursaday gabar dhallin yar oo qurux badan isaga oo nin da' ah dad baa waxay yiraahdeen wiilkaaga curudka ah baa naagtaada kuu daba maryeeyaa. Hadalkiina wuu fiday odaygii wuxuu goostay in uu dilo wiilkiisii ayuu ugaaskii goostay rag baa kala taliyay oo yiri la dili maayo waa la dhaarrinayaa dhaarta dhaar ugu xun ee lagu dhaarto ayaa la dhaarinayaa. Waa ogolaaday ugaaskii teneg biya ah ayaa deb la saaray. Biyihii markay kareen ee ay rogmadeen ayaa taana lagu riday, wiilkii ayaa la yiri ka soo bici taanada biyaha ku jirta rogmanaya iyada oo dabka saaran. Haddii aadan dembigaa gelin waxba ku gaari mahayaan, laakiin haddaad gashay gacantaada wey ku haraysaa, waana lagu dilayaa isla meesha ayaa laguugu dilayaa. Ninkii waa ka soo saara taanadii gacantiisii iyada oon waxba gaarin. Siddeetan iyo kowdii ayuu ninkii wuxuu ku dhintay degmada Waaberi ninkii ka soo saaray taanadii Unun iyaa la oran jiray. Boostada ayuuna ka shaqayn jiray. Waan arkay ninkii isla isagi wuxuu iiga sheekeeyay hadalkii wax jira in uu yahay oo kutiri-kuteen aan ahayn taa ayaan anigu sheeko ahaanna u maqlay. Markii aan rumaysayn waayayna 79kii ayaan ninkii weydiiyay. Marka isaga waan is niqiin ee laba gabdhood oo isaga uu dhalay baan Xalane macallin ugu ahaa.

Fiqi Buraale — Intaa aan wax ku sii daro ee horta tan uu ka sheekeeyay Ciise ee luqmadda la cunaya waxaa la yiraahdaa "luqmatu xajar" yaa la yiraahdaa xitaa iyada oo aan la cunin, qaarkood waxey sameeyaan inta ay kibista soo qaadaan ayay xaashi lagu dubaa in yar, markaasaa waxaa la yiraahdaa dhadhami. Qofkaa macashii baa ballaranaysa waa dhaar gooni ah "Luqmatu xajar" baa la yiraahdaa. Tii dabkana sidii beynu ku dhaafaynaa. Waxa kale oo jirta tan la yiraahdo raad qaad. Raad-qaadka saddex nooc weeye. Bal metel waxaa kuu joogsan waayay ilmo ee meel un ku carara. Siduu gurigiisa u joogo waa la raad qaadaa, waa lagu joojin oo fariisin baa la yiraahdaa. Qofna waxaa weeye qof la raad qaadayoo la raba in la is dhaafiyo, midna waxaa weeye ee Ilaahay inuu qofkaa ka musaafuriyo ee waxaa la sameeyaa

saddexdaa tallaabo ee uu qaadaya tallaabada horaa ciid laga qaada tan labaad baa la dhaafaa tan saddexaad baa misna laga qaadaa, qofka saa la leeyahay waa qof la leeyahay ha kuu joogo yuusan cashaan guriga ka tegin. Waxaa jira marka laba qaab baa jirta saanqaadka ah, mid baa la dhaafaa tan u horreyso ayaa la dhaafaa, tan labaad ee labada lugood is xigta ay ciiddeeda la qaadayaa taa kale ee iyada xigta iyada oo saddexaad ah ee aan ognahay ayaa la dhaafayaa tan afaraad baa la qaadayaa taasna waa kan la musaafurinayo ee la leeyahay ilaahay ha ka kaxeeyo (ama tuug ha ahaado ama cadow ha ahaado ama bahal ha ahaado) waa taasoo saan afar qaad baa la yiraahdaa. Marka waxaa jirta shanqaad. Shanqaadaas saddexna waa la qaadaa labana lama qaado. Kuwa iyaga waa qof la is dhaafinayo oo la yiraahdo, waa la saan qaaday meel uu joogsadaba ma laha. Waxaa la yiraahdaa qofkaas waa hebel is dhaafiyaa yaa la yiraahdaa oo meel uu joogsado ma leh. Haddaba arimahaasuu saanqaadku way fara badan yihiin ciidda ka badan illaa kow iyo labatan bey gaareen. Saanqaadkani waxaa lagu sameeyaa bahalaha, dadka aad gurigii aad uga caalweydid oo lagu fariisinayo, mid aad musaafurinayso, mid aad ku afxirayso. Waxaa jirta misna wax la yiraahdo kaadi shir oo qofka marka wax xado la sameeyo oo horta wacadka wa wacadoo wacad adag sida uu Ciise u sheegay wacadyada ama dhaarta waanu aragnay. Midda la yiraahdo raad qaadka, waa kii haddaayeto Daahir Af Qarshe wax buu ka sheegay. Laakiin siyaalaha loo qaadaa walow kitaabkaan la yiraahdo wax-walba-oge waxyaabihii aad nooga soo min guurisay ay aad u qiime leeyihiin, aftujtu iyaduna waa jirtaa. Wax kaleeto iyaa jira wax la yirahdo Burji-gur. Burjigurkaan iyaa isaguna jira. Qof baa magaciisa iyo magaca hooyadiisa la qaadayaa, markii la qaado iyaa la xisaabihayaa, markaasaa toddobo toddobo loo xisaabinhayaa, oo loo tuurayaa, marka toddobo toddobo loo tuuro ama saddex saddex baa loo tuurayaa, markaasaa magaciisa iyo magaca hooyadiina la isku darayaa, markaasaa wax laga soo sarayaa. Tiradii laga soo saray tiradaasaa wax sheegaysa kaadi-shir la yiraahdo oo marka dadkaas oo isla xaafaddiisa ah loo sameeynayo iyaa jirta. Waxaa jirta iyaduna mid la yiraahdo Afxir oo la yiraahdo afwaajan oo lagu sameeyo bahallada iyo abeesooyinka dooxooyinka.

Axmed Nuur

Horta aniguna aan ku darsado waxa kan la yiraahdo dabqaadka. Dabqaadka innaguna xaggayaga waa jiraa, dabkoo waa la qaadaa, dabbaa la shidayaa, marka la shido baa ninka la tuhmay waxaa la leeyahay haddaadan been sheegayn Ilaahay wacadkii dabkaa ku qaad oo haddii aad ka dhaaranayso ee waxaa aad ka dhaaranayso ay daacad kaa tahay oo aadan waxba ka qabin waxaa wax ku gaari mahayaan. Haddii kaleetose dabkaa baad ku gubanaysaa ee ka joog. Markaasuu ka joogayaa wixiina wuu bixin hayaa. Hadduusan waxba qabinna geedkii wuu qaadayaa waxna gaari maayaan. Markaasa qofka loo burha-gurayaa. Iyaguna dhowr noocaas ahina waa jiraan, waxyaalahaasna wey badan yihiin. Halkaas saan aan ku sii faafno, aan u gudubno dhinicii waxyaalihii la baasaysan jiray. Hadda waxaan u gudbeynaa waxyaalo la baasaysto. Waxa la baasaysto ah bey u badan yihiin; waxaa ka mid ah, ukunta habeenkii la bixiyo. Ukunta habeenkii la bixiyo sidee baa loo baasaystaa, oo maxaa ku yimaada qofkii bixiya?

Daahir Af Qarshow maxaad ka oran lahayd?

Daahir Afqarshe Waxyaalahaan la baasaysto habeen, dhulku haddaan wada maray wey tira badan yihiin, waxaana badi ahaan wax baa laga arkay oo waa dhaqan soo socday wax badan waa la yiri nin caalin ah oo wadaad ah oo ragga kutubada marayee heer sare ah oo aanu u naqaan Soomaalidu waa wada taqaanoo dhegtooda ku soo wada duulay oo la yiraahdo Ina Cali Qablax yaa loo soo tuuray mindi, markaasuu dabadeed ka soo daba tuuray qori yar, diinta miyay ku jirtaa baa la yiri, maya ee hooyaday baa tuuri jirtay dhaqankii un baan wataa buu yiriyoo sidaasaa aniguna uga daba tuurayaa. Markaas waxaan oo dhami waa wax la caadaystay waana wax dabadeed la ogaaday in ay wax ka wada jiraan, waana wax qofkii diintiisa ka joojisay ka haray, qofkii kale ee aan garaad wanaagsanaynina wuu la socdaa. Waxayba tahay waxaaba ugu cajab badan, bunka aynu karsanayno sida koobka shaaha ah aynu uga xulanay, cabbay ee koobkii mariyay ee gorgorkaa yar ee ku haray fooraariyay eeraadka yar ee dabadeedna inta daadatay ay dillimaad ku samaysay dabadeedna sidaa yiri ee ka faaliyay ee wax ka sheegay. Bal ninkaan ninka uu macallin u yahay sida uu wax ugu dhaadhicin lahaa baa ila yaab ah oo aad leedihiin ka wa ku taaro.

Axmed Nuur Oo maxaad leedahay hakuu wax u khiyaamaynayo ayuu wax ka arkayaa waa hab yaab u ah?

Daahir Afqarshe Waa hab yaab leh! Waxbuu eegayaa, marka dabadeed dadka kale dad wada la yaab leh, midbaa foox wax ku riday, wuu eegay fooxu dhanka uu u kacayo qaaca ka baxaya lixaadka uu leeyahay buu eegayaa dhanka xaggiisuu raacayaa, dhuxulaha meesha ku haray (cadcaddaan bigbigna oranayso taa xiddigaha bixiya oo kale) hoostooda ayuu wax ku eegayaa. Fooxii dabadeed marka uu i bixi waayo waa caytamayaa. Fooxii oo isagu aan wada maranin yaa qaar dhuxul madow is fuulaysa oo dabadeed isagoo jaamuday halkiisii ku haraayaa, midna waa wada dhammaanayaa siduu u faxayay oo aakhirkii marka dambashuu noqday dhuxulna dusha ka fuushin. Sida ay wax uga eegaanba waa waxyaalo caynkaas ah.

Axmed Nuur Aan u noqdo ninka la yiraahdo Fiqi Buraale. Fiqi Buraale ukunta habeenkii la bixiyo, cusbada habeenkii la bixiyo, irbadda habeenkii la bixiyo ee la baasaystaa dhibaataa ka imanaysa oo waa la diidaa, waa la diidaayaa, haddaad bixiso wax baa ku gaaraya. Marka waxyaalahaas ee cusbada habeenkii la bixiyo ama la gadayo la diida oo la yiraahdo: Ukun habeenkii ha noo soo doonanina, mindidaa la isku tuurayi iyo waxyaalahaa maxay kula tahay? Soomaalidu waa baasaysataayoo baasaysigaasi muxuu keenaa oo maxaa ka mid ah, maxaa loo baasaysanayaa?

Fiqi Buraale Horta arrintaas iyada ah wey jirtaa, intaa qura un maahee wey fara badan yihiin. Bil matal waxaa jira dhirtaa Ilaahay waa isku mid, marka aad tira i weydiisana waxaa u badan bahalka la yiraahdo Jiraca, geedka Jiica la yiraahdo iyaa ugu tira badan qofkii dhaafayaaba waa in

uu dhagax ku dhufta Jiica. Waxaa la mid ah haddii la is weydiiyay maxaa saa loo sameeyaa? Waxaa la yiri waa gaar, dhirtiina wax kaga duwan yahay oo kaga gaarsan yahay ma aragno. Waxa kale oo jirta arbacada maalintii bil u dambaysa lama guursado lama dagaalamo saasaa la yiraahdaa. Haddii la doono waxaa la yiraahdaa, maalin Carabtu la jibiyay oo Yoomu Rubuc la yiraahdo. Yoomu Rubuc baa la yiraahdaa oo maalin Carabta laga adkaaday ee ah semenadii hore semenkii jaahiliinta, markaasaa la yiri Yoomu Rubuc saasaa loo sharaystay baa la yiri, waa kow. Irbadda tan ee la yiraahdo la isma siiyana habeenkiina la diido waxaa la yiraahdaa haddaad bixinaysana iyada oo aan lifaaq ku jirin ha siinin dadka. Waxa kale oo la yiraahdaa cusbada ha bixin habeenkii, hadaad bixinaysayna taa ku weydiinaysee waa in ay tiraahdaa, Sooguddo, ee lama oran karo cusbo i sii. Magacii baa la bedelayaa oo Sooguddo ayaa loola baxay. Sooguddo i sii. Ukuntii iyadana waxaa la yiraahdaa ha bixinin, macnaha loo bixin waayay kama war hayo, laakiin aniga waxaan u aqaannaa, waxaas oo dhammi, waa caado dad hore laga soo wariyay, marmar baan aniga waxaan iraahdaa war waxa kan waxaa fasiray ma nin sixirow ah baa ama waa nin beenaale ah, kuwaas oo dhan iyo kuwo ka sii badan oo ciidaas ah wey jiraan. Arbaca mugdi u dambeysa lama guursado gabadha bil saddexda dhalata lama guursado, shan u yarta lama guursado, cusbada la isma siiyo habeenkii muraayadaha la iskuma eego, waxyaalahaas oo dhan waa la sheegaa laakiin waxa ay yihiin warba kama hayno.

Axmed Nuur Waybu kala gurguraynaaye mid weliba waxa loo maleeyo iyo waxa loo qaatay ayaanu u kala qaadanaynaa, waxaas oo dhan hadda waxaan rabnaa in aan ku wada doodnee ee bal oodeyaal dhabac sida ay kala korreysa ayaa loo kala guuraa, ee waxaan la yiraahdo, iskatallabsiga, diin-ka-tallabsiga, tallabsigaas qof hadduu ka tallabsado, cagaha oo la isa saaro dadku isasoo jeediyo. Waxyaalahaa maxaad Daahir Af Qarshow ka oran lahayd? Maxay tahay maxay keenayaan?

Daahir Afqarshe Waxay keenayaan horta ma naqaano sidaa Fiqi Buraalaba ku sheegay weeyaanoo waa caadaadkii dadkii hore laga soo gaaray. Hallaga soo gaaro ee weynu ka harnaye waxa u sabab ah weeye waxan aynu naqaan oo wax iska ciyaar ah ma aha ee waxa xilligan soo gaarsiiyay ee ay Soomaalidu u dhexqaadayaan, waa camal waagoodii hore e la ogaadey dabadeedna qaarna ku shaqaysanayaan qaarna ay ka hareen oo ay yiraahdeen diinteenaan ogolayn dabadeena qaarna ku shaqaysanayaan qaarna ay ka hareen oo ay yiraahdeen diinteenaan ogolayn waxa shakiga wada keenaya horta shakigu saasuu horta dadka cilmigaasuu u dhex qaadayaa waana fara badan yihiin waxaana lagu shaqaystaa. Qofka oo nool haddii lagu tallabsado, Meydkaa laga tallabsadaa ee aniga oo nool maxaad iiga tallaabsatay, buu ku leeyahay saa meydka isaga looma leh, marka laga shaqaynayo oo qofka mayrayo ee ka tallabsanayo, laakiin qof nool waa mamnuucba, waxaa kuu diidaysaba adigu aqoontaada.

Axmed Nuur Oo dhimashuu ii saadinayaa buu leeyahay?

Daahir Afqarshe Haa! Dhimashuu ii saadinayaa buu leeyahay.

Axmed Nuur Wax kaleetona wey yiraahdaanoo oo waxay yiraahdaan qofkaas hadduu cudur qabay cudurkii baad ka qadaysaa bey ka dadkii ka raaridaan.

Fiqi Buraale Giddigiin waxaad ka eegtaan, marka la dukanaayo (salaadda lagu jiro) lama hor fariisto saa meydka dadka dukanaaya la hor dhigaa ee saaddaas xun buu ka cararayaa.

Axmed Nuur Haddi aan ku sii noqonno cusbadii bixinteedii iyo wax cad la bixinayo waxay yiraahdeen baa la yiri, waxaa laga baqayaa qofka cusbada bixiyay habeenkii ama waxaa cad bixiyay in wax loogu qabtoo oo qofkaasuu cayroobo, wuu cayroobaa bey dhahaan.

Fiqi Buraale Cusbada iyo ukunta iyo cirbadduu waxaa looga cararaa bey yiraahdeen qatar ahaan. Tan la yiraahdo ukunta iyo cusbada waxbaa lagu qabtaa bey yiraahdeen, waxaa suurtowda in qofkii kaa qaaday xumaantaada doonayo marka saddexdaba saddex cusbo ayaa laga daba tuuraa baa la yiri. Ukuntana ukun kale ayaa la jebiyaa ayay dhahaan. Saasay leeyihiin.

Daahir Afqarshe Sida aan sheegnay wax waliba cilmi bey ku fadhiyaan. Maalin talaada ah rag baa jira aan gurigiisa ka safrin. Oo muxuu uga jeedaa? Maalintii Ilma Nebi Aadan – gabadha isu dilay baa talaado ahayd. Waxay ku leeyihiin dee dhiiggaa daata ee ayaantaas nuxuska ah ayay diidayaan (intaas oo adiga ku bukootaa) ee la iskama daadiyo dhiigga, watan oo la leeyahay ayaama la leeyahay idaha lama suuto, maalin baa la leeyahay wax lama qalo saddex bilood oo la leeyahay rajalo oo dadka qaar aanu guursanin baa jir, dadka qaarna waa iska gee laynaan bixni. Dadka qaar waxay yiraahdeen la ilama dego “Reerahay rajalo la lama dego” lagamana durkee waa lala dersaa laba reeroo cid meel ka soo wada guuray oo dabadeed meel kala yaal.

Axmed Nuur Bilahee ay yihiin bilahaas?

Daahir Afqarshe Waxaa weeye Rajab-hore iyo Rajab-dhexe iyo rajab-dambe. Waa saddex dambe oo is xiga. Laba bil dhurre iyo saddex rajalood gel ama baxshaa la yiraahdaa. Shantaas ayaa is xiga. Dabadeed waxaa lagu macaamiloonayaa wax waliba meel bay ku leeyihiin farlaga soo guuriyay.

Fiqi Buraale Laba bil dhurre iyo saddex Rajalood waxay ku aadan yihiin (rabiical awal, rabiica taani, jamaadul awal, jamaduul taani iyo rajab) Marka waa tan sekada xoolaha laga baxshaa, mar haddii la sabuuxana waa la bixin karaa. Arka waxaad ka eegtaan dabshidka sow addunka lama wada shido caddaan iyo madow? Caddaan iyo madow horta dabshidkani waa jira, waa kow, qolo wey ka bood booddaa inta ay dab shiddo. Qolana waxay samaysaa inta ay biya qaadday seyrseyrtaa oo waxay dhahdaa “Neyruus-Neyruus” bey tiraahdaa dabkana wey shidaan e way ka bood booddaa. Qolo farday fuushaa oo inta ay fardo

duushaa bey cararaan fiidkii marka ay tahay, markaasay aad ugu ordaanoo soo noqdaan misna oo Neyruus. Qolana waa qolada tan webiga ah oo reer Afgooye ah waaba is dilaan, dabshid baa la yiraahdaa oo waxay qabaan haddii ayan is dilin oo laba ciidan la isku dilin naagna in ayan u uuraysanaynin webina biyo u kenaynin, beerana ayan u baxaynin. Marka waxa meeshan laga yiraahdaa “Caada la diiday cara Allay leedahay”. Caadadii wixii xuna, dee dadka soo gaaray dadkii hore weeye. Dadkii baa marka qaarna sidii buu ku wadaa weli, dadna wuxuu yiri “Waxaas waa xumaayeen oo waan iska daynaynaa”. Marka dad baa waxay yiraahdaan Timaha habeenkii lama xiiro, muraayadaha la iskuma dayo, ciddiyaha guriga gudihiisa laguma jarto lagumana daadshana, waa la yiraahdaa. Timaha waa la aasaa marka la xiiro waxa laga baqayo wax kale maaha ee waa sixir.

Axmed Nuur — Aan ka gudubno waxaa la yiraahdaa diinkatallaabsi waxaan maqalnaa bahalkaan diinka baa la soo qaadaa oo carruurta kaadido oo habeenkii ku kaadido ayaa oogadiisa la saaraa maxaa waxaa ka jra, sideebaana loogu dhaqmaa?

Fiqi Buraale — Labadaas aan kaaga horreeyo, diinka. Diinka laba u kal saaran, qof waa qof waayel ah oo arxadaa ka xanuunsanaayo iyo lafaha, wax un bey ula jeedaan. Diinow Diin Ilaah, Awoowow awoowow, wey yiraahdaan, Diinna waxaa weeye candhuuf baa la saaraa oo waxaa la yiraahdaa carruurta, ilmaha kan waa toobay- kaadidooy dey waayeen wixii uu cabbaayay baa laga joojiyay oo waxyaalo adag baa la siiyay kaadida dey waa sideedaba la yeelaa? Diin baa lala doontaa oo dhabarka loo saaraa, waa lagu joojiyaa, haddaba Ilmahaas inuu kaadidii joojiyay iyo kale kama warhayo laakiin in la saaraa waan ogsanahay.

Axmed Nuur — Waxaan ku dari lahaa sida Fiqi Buraale u sheegay ayuun baa horta la sameeyaa marka ay ilmaha habeenkii ay isku kaadshaan. Wadaadada qaarkood waxay leeyihiin, wadaad oo dhan horta wax yar maahinee, wadaad aan qardhaas qorin waa yar yahay tassarufkay ka mid tahay. Markaa dabadeed ka qardhaasta qorayaa ee ilaahay u baryaayaa dadka amase tahliisha ugu dhigayaa quraanka ee ku akhrinayaa ee dabadeedna dadka ilaahay ugu bogsiinayo iyo waa kala goonni nimanka kan ee rasgalka ah ee masaamiirta iyo belo iyo baas kale wax ku dhufanaya waa kala gooni, wixii oo dhammina waa wax ka jira.

Axmed Nuur — Marka Diinka kan maxaa looga dan leeyahay?

Daahir Afqarshe — Waxaa la leeyahay diinkani waa kaadi badan yahay, kaadidii baa ku wareegeysa, kaadidii wiilka uu isku kaadshay ayaa diinka ku wareegaysa. Waxaana la sheegay diinku “Ma diinbaa kaadi badanaa” “Kaadi badanaa ma diinbaa” Ilmaha yar ee dhashay waa tay Soomaalidu ku yiraahdaan kaadi baadanabaa ma diinbaa?

Axmed Nuur — Ma diinkaa kaadi badan?

Daahir Afqarshe — Haa, diinkaa kaadi badan.

Fiqi Buraale — Taa waa hubaale, waxaan la yaabanahay dadkaan leh, naagaha kan leh, ma diinbaa kaadi badanaa, ma diin bay haysan jirtay? Had iyo goor misna waa xogogaal caadooyinkii baa laga soo gaaray waxan.

Daahir Afqarshe — Marka anigu waxaan ku arkay aan idiinka sheekeeyo. Iyada oo ay kaliil tahay oo roob la waayay oo aan Hargeysa joogaa oo ay tahay abaartii Gaar gaari saar, oo aan roobi ka curan waddanka gebigiisaba yaa daruur yari soo joogsatay. Markaasaa daruurtii inta aan u baxay aan iri Ilaahayow soo shub. Makhsin weyn baan ku jiraa oo iskuul ah dhagagax baa dhulkii yiri, markaasaan waxaan arkay, diinkuna waa tan jiilaalkii aan la arag, meel aan miraayadahaa ahaynoo dee iska furan, manjaroorka ayuu isagana yimi, markaasaa biyihii raysku sii daayay meeshii, goorta anba waan jeclaayoo waan ku mayran lahaayee markaasaan iri diinka kan bal jarrib, diinka wuxuu u cabbayaa suda geeluu uu cabbaa oo kale oo cankuu buurayaa haw-haw-hawdaasu hayaa, sidaana waan u dul taagnaa dee ma aragtay waanu i arkayne halka ka saraysa sidaan u eegayaa, daaqaddan yar ee khafiifka ah yaa mid kaayaga barbar ka jooga. Biyihii markuu ka dhegay ayuu toosay oo xagga dambe ka sii daayay milif madow o aad maleyn karin. Biyihii buu ku noqday oo ka dhergay uu sii daayay. Cadadkii ma aanan tirinin laakiin dhowr goor adigu toban siyaado in ay leedahay yaan garanayaa inuu cabbayay uuna kaadshayay. Markii calooshii mayrantay oo uu biya biya cad markii dambe sii daayay ayuu iska tallaaba qaaday luqun dheer halkaa bixiyayoo markaa iska tegay. Markii hooyadii oran jirtay, kaadi badanaa ilmuhuu ma diin ceelaad baa, diin ceelaadkaa la sheego waa kan biyaha ku jira. Markaa taa anigaa indhahayga kaga qaaday waa wax ay ogaadeen in uu kaadi badan yahay, waxaana la leeyahay kaadidii baa ku wareegaysa kan. Waxayba sheegayaan niman wadaad ah awrka madow dabadiisa haddii seynta laga gooyo oo ilmaha lagu uumiyo kaadida badan leh, kaadida wey guureysaa ee waa tijaabo la soo arkay.

Axmed Nuur — Waxaa kale oo aan u sii gudubnaa ee waxa la yiraahdo Xiidgood. Bahalkaan xiidka ah oo xiidanxiitada ah aynu niraahno oo meesha iska joogta ayaa waxaa la yiri carruurta kaa qaadaysa. Sidee baa bahalka halkeeda joogta carruurta u qaadaysaa? Fiqi Buraale bal alaabtaa ku horrey.

Fiqi Buraale — Aniga waxaan u aqaannaa xiita-xiite waxaa la yiri, Haad yaa shiray, waxaa la yiri caawa haddii aynu nahay haad aan isu nimaadno (waa iska sheeko khayaali ah baan u malaynayaa) maahmaahna waa daba socdaane! Waa la shiray, habeenkii. Markii meeshii la shiray baa haad ka guuray inta ay seexatay. Haadkii baa ka guuray inta hilib la cunay, xiita-xiitaa meeshii looga tegay. Markaasaa la yiri,Xiita-xiitaa markii ay aragtay keligeed in ay meesha ku soo hartay ayaa waxay tiri: saddex waan ka dhaartay, hilibow cunidda, waan ka dhaartay. Habeenow seexashadaa waan ka dhaartay. Marka habeen oo dhan bey soo jeeddaa. Haddaba caruurta marka ay hululufoo duusho waxaa la yiraahdaa carruurta wax bey yeeshaa. Habeen bey iyadu duushaa, lama arkaa waan koox iyo had iyo goor ee mid qura ee meel fadhida la arki maayo waa koox-koox, koox-koox bey u socotaa. Ilmaha xiinkiisa

| | |
|---|---|
| | maqla wuu dhuudhuubtaa xiito xiito ayuu noqdaa saasay wax ku gaarsinaysaa. |
| Axmed Nuur | Daahirow maxaad ka leedahay lafa-xiito ee carruurta loo xirayo, maxay taa kaga celinaysaa? |
| Daahir Afqarshe | Waxay anigu ila tahay, sidii kii xagga saacadda kaga baqayeen ee ahaa ee aboodiga oo kale sidaa aawadeed bey dabadeedna uga baqanayaan saasay dabadeedna lafaheeda ugu xirayaan (laf xiito ugu xirayaan). Bahalkan aboodiga waa taa dega oo saaladiisa aragnay ee dhulku fariistaa, markaasuu dabadeed maalintii uu ka shaqaystaa. Xiita-xiitana iyadu dhirba shuqul kuma leh, waa taa ay ka dhaaratay oo ay tiri: Hilibow ku cuni maayo, haadayna ku raaci maayo, habeenowna ku seexan maayo". Xiita-xiitadu wixii ay aragto in ay ka cararto oo ka fogaato maahine iyadu waa shimbira dhulka. Beydkeeduna dabadeed meel yar bey u sameysaa oo cawska barbarkiisaad dabadeed ku arkaysaa oo halkaasay ka dilaacsataa oo bahalkan la yiraahdo qaraska dadka qaarna u yaqaana Qalowlow isna waa taa dhulka jiifa ee fardaha haddii aad ku joogto ka didiya biririf yiraahaa. Duufleyduna dhulka ayay u hooyataa. Waxyaalahaa oo dhan waa waxyaalahaa dhulka u hoyda haddana haadka ah. |
| Fiqi Buraale | Laakiin bahashatan la yiraahdo qololaha anigu ma aqaano qaraska maxaa yeelay Qalow iyo Fiin labaduba waa la yiraahdaa, waa tan la yiraahdo fiiney maxaad la oynaysaa? Waxay tiraahdaa, gudcur mararow, waa habeen mugdi ah iyo, soo hoomorega soo socdo, taasaan ka ooyayaa yay tiraahdaa, badina waa tan tiraahdaa, kow kow kow. Waa lag faaliyaba. |
| Axmed Nuur | Cida guuguulaha bal labaad hadal oska qaad oo iyagana hala saaro oo say u kala yaalin, cida fiinka muxuu keenaa, maxaa ka yimaada, maxaa laga filayaa, muxuu micna ah uu u gudnoon yahay? |
| Fiqi Buraale | Waxa weeye bahasha la yiraahdo Fiin waxaa looga faaliyaa, col baa looga faaliyaa, roobbaa looga faaliyaa, abaar waa looga faaliyaa. Saddexda ciyood hadba sey u cido yaa looga faaliyaa, saddex cabsiyood weeye aan ku darno ee cudurna waa looga baqaa. |
| Daahir Afqarshe | Maxaa dabadeena ku tusaya, ninkan shaacirka ah sow ku tiri: Golow labada fiid ciya, ilayn maalintii kuma jirtee, Galow labada fiid ciya wax baa laga fareeyaaye, malaa firadan kor duushay bey fiintu naawiliye. Marka cida maqribkii hayso in ay ribax la socoto ama col iyo wax kastoo khatar ah bey ku tusaysaa. |
| Axmed Nuur | Aan ka sii gudubno wakhtiguna waa nagu sii dhowyahay, oohinta eyga ama ubateynta eyga oo eygu ooyo Soomaalidu wey baasaysataa, muxuu keenaa baa la yiri, oo loo baasaystay? |
| Daahir Afqarshe | Waxay yiraahdaa wuxuu ka warramayaa geeri, oo isaga kow dheh, xuunshatada aqalkeeda iska fuusha dushiisa iyo Maansa lugaleey gurigaaga gasha e laga saari waayo oo si kasta oo aad tiraahdo iyada |

oo alla bari iyo wax la sameeyo maahee-laga saari waayo waa la kaxeeyay haddana halkeedii bey ku soo noqonaysaa. Waa masiibo meesha iska fariisatay. Bahashatan la yiraahdo Shimbir libaax oo gumeystana la yiraahdo guriga haddii ay fuusho ama illinkaagaba uu’udaa gurto waa saan cadde la isla wada ogyahayoo, dabadeed reerka waa in uu Alla baryaa Bismillahi Raxmaani Raxiim horaa loo ogaaday in ay dabada masiibo ku wadato.